WARSAN
OO KU SAABSAN
CIISE MASIIX

LENARD GALSTER

THE GOOD NEWS ABOUT JESUS IN SOMALI

WARSAN OO KU SAABSAN CIISE MASIIX
Waxaa laga soo qaatay Kitaabka Axdiga Cusub

Xuquuqda nuqulka © 1992 LENARD GALSTER
Daabacaaddii koowaad ee af Soomaaliga 2002
Daabacaadda labaad ee af Soomaaliga 2010

Waxaa laga daabacay nus malyuun nuqul, waxaana lagu tarjumay in ka badan soddon af oo ka mid ah afafka waawayn ee caalamka, walina kuwo kale ayaa lagu tarjumayaa.

Naqshadda jaldiga waxaa sameeyay: Lenard Galster
Sawirada waxaa xardhay: Mark Watkins

Tarjumadda iyo faafinta kitaabkan waxaa sameeyay Lutheran Heritage Foundation. Dhammaan xuquuqda nuqulkuna way u dhawran tahay. Gabi ahaan ama qayb ka mid kitaabkan lama soosaari karo, loomana rogi karo qaab kale sida elektroonik, coday, sawirid, iwm. iyadoo aan oggolaansho qoran laga helin soosaaraha.

Lutheran Heritage Foundation
51474 Romeo Plank Road
Macomb, MI 48042
United States of America

TUSMO

	Qaybta	Bogga
1.	Eebbe wuxuu ku yimid dunida Ciise	4
2.	Wax ku saabsan shakhsiyadda Ciise	6
3.	Ciise wuxuu dadka ugu yeedhaa inay noqdaan xertiisa	10
4.	Ciise dadkiisa waxbuu baraa wuuna barakeeyay	12
5.	Ciise wuxuu kuwa isaga raaca siiyaa waxay doonaan	14
6.	Ciise wuxuu ka jawaabaa tukashada	16
7.	Ciise wuxuu cafiyaa dambiga wuuna bogsiiyaa dadka	18
8.	Ciise wuxuu dadka u hogaamiyaa Eebbe iyo nolosha buuxda	21
9.	Ciise wuxuu badbaadiyaa dunida	24
10.	Ciise wuxuu dadkiisa siiyaa nolosha cusub	32
11.	Ciise wuxuu dhisaa kaniisaddiisa	36
12.	Ciise dadkiisa wuxuu u qaadaa jannada	39

QAYBTA KOOWAAD
EEBBE WUXUU KU YIMID DUNIDA CIISE

1. Eebbe wuxuu dadka ugu yimaaddaa Ciise

"Kanu waa warsan oo ku saabsan Ciise Masiix, Wiilka Eebbe." Markos 1:1 "Oo wuxuu ahaa go'aanka Eebbe in Wiilka qudhiisu uu yeesho dabciga Eebbe oo kaamil ah." Kolosaay 1:19. "Oo markii la gaadhay xilligii ku habboonaa, Eebbe wuxuu soo diray Wiilkiisii. Wuxuuna yimid isagoo ah sida wiilka hooyada aadanaha." Galatiya 4:4.

2. Magaca "Ciise" macnihiisu waa dambi ka badbaadiye.

"U bixi Ciise – waayo wuxuu dadkiisa ka badbaadin doonaa dambiyadooda." Matayoos 1:21.

3. Imaatinka Ciise isagoo ah Badbaadiye iyo Sayid waxay keentaa farxad!

"Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, 'Ha baqina! Waayo ogaada waxaan idiin keenay warsan oo u leh farxad wayn dadka oo dhan. Waayo, waxaa maanta magaalada Daa'uud idiinku dhashay badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga ah!'" Lukoos 2:10-11.

4. Ciise wuxuu ku dhashay, oo ku noolaa, kana shaqeeyay meelo illaa maanta jira.

"Goortii Ciise ku dhashay Baytulaxamtii Yuhuudiya, waagii Herodos boqorka ahaa." Matayos 2:1.

"Markuu Ciise maqlay in Yooxana la qabtay, ayuu Galili ku leexday, mana sii joogin Naasareet, laakiin wuxuu aaday si uu ugu noolaado Kabernam, magaalo u dhaw harada Galili." Matayos 4:12-13. "Markii Ciise uu billaabay shaqadiisii wuxuu ahaa sodon sano jir."

QAYBTA LABAAD
WAX KU SAABSAN SHAKHSIYADDA CIISE

5. Ciise waa caaqil iyo qanciye

“Dadkii maqlay oo dhan ayaa la yaabay garashadiisa iyo jawaabtiisa.” Luukos 2:47

“Waxayna la yaabeen wax bariddiisa waayo, wuxuu wax u barayay sida mid amar leh oo uma baraynin sida culimada.” Markos 1:22.

“Kulligood markhaati bay ahaayeen wayna ka yaabeen hadallada nimcada leh oo afkiisa ka soo baxaya.” Luukos 4:22.

Sawir: Ciise oo jooga macbudka

6. Ciise waa wuxuu leeyahay magac wayn
“Waxaana raacay dad badan oo ka yimid Galili iyo Dekabolis iyo Yerusaalem iyo Yuhuudiya iyo wabi Urdun shiishadiisa.” Matayos 4:25. “Goortuu Yerusaalem galay, magaalada oo dhan waa kacday.” Matayos 21:10.

7. Ciise waa mid deggan oo is hoosaysiiya
“Harqoodkayga dushiinna ku qaata oo wax iga barta; waayo waan qaboobahay, qalbigayguna waa hooseeyaa, oo naftiinna nasashaad u heli doontaan.” Matayos 11:29.

8. Ciise waa mid dad jecel
“Siduu Aabbuhu ii jeclaaday, ayaan anna idiin jeclahay, jacaylkayga ku sii jira.” Yooxana 15:9.

9. Ciise waxaa ka buuxa farxad
“Saacaddaas qudheeda ayuu Ruuxa Quduuska ah ku reyreeyay.” Luukos 10:21. “Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay in farxaddiinnu idinku jirto iyo inay farxaddiinnu buuxsanto.” Yooxana 15:11

10. Ciise saaxiibtinimuu leeyahay
“Mar dambe addoommo idiinku yeedhi maayo, maxaa yeelay, addoonku garan maayo wuxuu sayidkiisu sameeyo. Laakiin, saaxiibbo ayaan idiinku yeedhay,

maxaa yeelay waxaan Aabbahay ka soo maqlay oo dhan ayaan idin ogaysiiyay." Yooxana 15:15.

11. Ciise wuu u calool-xumaaday dadka
"Oo markuu ku soo dhawaaday, ayuu magaalada arkay oo uu ooyay." Luukos 19:41. "Markaasuu ku yidhi, 'naftaydu aad bay u calool-xuntahay tan iyo dhimasho." Matayos 26:38. "Ciise waa ooyay." Yooxana 11:35.

12. Ciise wuu tiiraanyooday
"Markaasaa Ciise la yimid iyaga meel Getseman la odhan jiray, oo wuxuu xertii ku yidhi, 'Halkan fadhiista intii aan halkaas tagayo oo ku soo tukanayo.' Oo wuxuu kaxaystay Butros iyo labada wiil ee Sebedi. Oo wuxuu billaabay inuu calool xumaado oo tiiraanyoodo." Matayos 26:36-37.

13. Ciise wuu cadhooday
"Goortuu iyaga isha mariyay isagoo cadhaysan oo qalbigiisii ka tiiraanyooday qalbi engegnaantooda aawadeed." Markos 3:5

14. Ciise wuu aamusay
"Isaga sida wan la qalayo baa loo kexeeyay, oo sidii lax ku aamusan ninka dhogorta ka xiira hortiisa." Falimaha Rasuulada 8:32.

15. Ciise dambi ma lahayn
“Isagu ma uusan dambaabin, khiyaanana afkiisa lagama helin.” 1Butros 2:22.

16. Ciise dambiguu saamaxaa
“Markaasaa Ciise wuxuu yidhi, ‘Aabboow, iyaga cafi! Waayo garan maayaan waxay samaynayaan.” Luukos 23:34.

17. Ciise wuu awood badan yahay
“Oo Ciise ayaa u yimid oo la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, ‘Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyay.’” Matayos 28:18. “Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa.” Cibraaniyada 1:3.

18. Ciise wuxuu mudan yahay ammaan
“Hortooda ayuu ku baddalmay, wajigiisuna sida qoraxda oo kale ayuu u dhalaalay, dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday.” Matayos 17:2. “Midabkiisu wuxuu u ekaa dhagax yasbid iyo dhagax sardiyos, oo carshigana waxaa ku wareegsanaa qaanso roobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumrud.” Muujintii 4:3.

QAYBTA SADDEXAD
CIISE WUXUU DADKA UGU YEEDHAA INAY NOQDAAN XERTIISA

19. Ciise wuxuu doonayaa in dadku u yimaadaan oo isaga raacaan

“Ii kaalaya kulligiin, kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanoow.” Matayos 11:28. “Wuxuu doonayay inuu Galili tago oo wuxuu helay Filibos. Ciisena wuxuu ku yidhi i soo raac.” Yooxana 1:43.

“Ciise kolkuu meeshaas ka tagay intuu socday ayuu wuxuu arkay nin la odhan jiray Matayos oo fadhiya meesha canshuurta lagu qaado, oo wuxuu ku yidhi, i soo raac, markaas ayuu kacay oo raacay.” Matayos 9:9.

Sawir: Ciise oo dadka ugu yeedhaya inay xertiisa noqdaan

“Oo goortay maalin noqotay ayuu xertiisii u yeedhay, markaasuu laba iyo toban ka soo saaray, wuxuuna u bixiyay Rasuullo; oo waxay ahaayeen Simoon kan uu Butros u bixiyay, walaalkii Andros iyo Yacquub iyo Yooxana iyo Filibos iyo Bartolomayos iyo Matayos iyo Toomas iyo Yacquub ina Alfayos, iyo Simoon oo la odhan jiray Qiiroole, Yuudas ina Yacquub, iyo Yuudas Iskaariyot.” Luukos 6:13-16.

“Anigu waxaan ahay nuurka dunida, kii i soo raacaa gudcurka kuma socon doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka nolosha.” Yooxana 8:12. “Markaasaa Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi, ‘Mid uun hadduu doonayo inuu iga daba yimaaddo, ha is inkiro, iskutallaabtiisana ha soo qaato, oo ha i soo raaco. Kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo wuu lumin doonaa, oo kan naftiisa u lumiya aniga aawaday, wuu heli doonaa.” Matayos 16: 24-25.

“Ciise wuxuu ku yidhi, i soo raaca waxaan idinka dhigayaa kuwo dadka jillaabta.” Markos 1:17.

“Haddaba taga oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga.” Matayos 28:19. “Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduuska ahi idinku soo dago, oo markhaatiyaal ayaad iigu noqon doontaan Yerusaalem iyo Yuhuudiya oo dhan iyo Samaariya iyo meesha dunida ugu fog.” Falimaha Rasuullada 1:8.

QAYBTA AFRAAD
CIISE DADKIISA WAXBUU
BARAA WUUNA BARAKEEYAA

20. Ciise xertiisuu wax baray

“Markuu dadkii badnaa arkay ayuu buur fuulay, markaasuu fadhiistay oo xertiisa ayaa u timid. Kolkaasuu afkiisa kala qaaday oo wax baray.” Matayos 5:1-2. “Isagu habeenkuu u yimid Ciise, wuxuuna ku yidhi, ‘Macallimow waanu ognahay inaad tahay macallin ka yimid Eebbe, waayo ninna ma samayn karo calaamooyinkan aad samayso haddaan Eebbe la jirin.” Yooxana 3:2.

Sawir: Ciise oo wax baraya una ducaynaya dadkiisa

21. Ciise kuwa isaga raaca wuu barakeeyay

“Gacmihiisuu ku qaaday oo intuu calaacalihiisa saaray ayuu barakadeeyay.” Markos 10:16. “Markaasuu iyaga kaxeeyay ilaa meel ku dhow Baytaniya, oo intuu gacmihii kor u qaaday ayuu barakadeeyay.” Luukos 24:50.

“Ii kaalaya kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, oo anigu waan idin nasin doonaa. Harqoodkayga dushiinna ku qaata oo wax iga barta, waayo waan qaboobahay qalbigayguna waa hooseeyaa oo naftiinna nasashaad u heli doontaan. Waayo, harqoodkaygu waa dhib yar yahay oo rarkayguna waa fudud yahay.” Matayos 11:28-30.

Aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay buuxnaan u haystaan.” Yooxana 10:10.

QAYBTA SHANAAD
CIISE WUXUU KUWA ISAGA RAACA SIIYAA WAXAY DOONAAN

22. Ciise wuxuu kuwa isaga raaca siiyaa waxyaabaha ay u baahan yihiin xagga jidhka, ruuxa iyo hugaba

"Isaguna wuxuu qaaday shantii kibisood iyo labadii kalluun, oo intuu cirka eegay ayuu barakadeeyay, kibistii ayuuna kala jejebiyay oo xertiisii siiyay inay hortooda dhigaan, labadii kalluunna wuu u qaybiyay gidigood." Markos 6:41.

Sawir: Ciise wuxuu xertiisa siiyay waxay u baahnaayeen

“Ciise ayaa Galili oo dhan ku wareegay isagoo sunagoogyadooda wax ku baraya, oo injiilka boqortooyada ku wacdiyaya, oo bukaan oo dhan iyo cudur oo dhan bogsiinaya dadka dhexdiisa.” Matayos 4:23.

“Anigu waxaan ahay kibista nolosha, kii ii yimaaddaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma haraadi doono waligiis.” Yooxana 6:35.

“Oo isagu waa dhalaalka ammaantiisa iyo u ekaanta ahaantiisa, oo wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa.” Cibraaniyada 1:3. “Eebbahay wuu idin siin doonaa wixii aad u baahan tihiin oo dhan, sida ay tahay hodontinimadiisa xagga ammaanta Ciise Masiix ku jirta.” Filiboy 4:19.

QAYBTA LIXAAD
CIISE WUXUU KA JAWAABAA TUKASHADA

23. Ciise wuu maqlaa wuuna gargaaraa kuwa isaga u yimaadda

“Oo bal eeg, waxaa u yimid nin baras leh oo caabuday oo ku yidhi, ‘Sayidoow, haddaad doonayso waad i daahirin kartaa.’ Ciise intuu gacantiisa soo taagay ayuu taabtay, oo ku yidhi, ‘Waan doonayaa ee daahirsanow,’ kolkiiba baraskii wuu ka daahirsanaaday.” Matayos 8:2-3.

Sawir: Ciise wuxuu ka jawaabaa tukashada

“Goortuu Kafarna’um galay, waxaa u yimid boqol-u-taliye, isagoo baryaya oo leh, ‘Sayidoow, midiidinkaygii guriguu jiifaa, isagoo curyaannimo u buka oo aad u xanuunsanaya,’ kolkaasuu Ciise ku yidhi, ‘Waan imanayaa oo bogsiinayaa.’” Matayos 8:5-7.

“Waxay ku yidhaahdeen Sayidoow, in indhuhu noo furmaan ayaanu doonaynaa. Ciise intuu u naxariistay ayuu indhahooda taabtay, oo kolkiiba waxbay arkeen, wayna raaceen.” Matayos 20:33-34.

“Laakiin goortuu dabayshii arkay ayuu baqay, oo markuu billaabay inuu dego ayuu qayliyay oo ku yidhi, ‘Sayidoow i badbaadi, oo markiiba Ciise gacantiisuu u taagay oo qabtay, oo ku yidhi, ‘Rumaysad-yareyohow maxaad u shakiday.’” Matayos 14:30-31.

“Waydiista oo waa laydin siin doonaa, oo waad heli doontaan, garaaca oo waa laydinka furi doonaa.” Matayos 7:7. “Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, naagtaay, rumaysadkaagu wuu wayn yahay ee ha kuu noqoto sidaad doonaysid.” Matayos 15:28.

QAYBTA TODDOBAAD
CIISE WUU CAFIYAA DAMBIGA WUUNA BOGSIIYAA DADKA

24. Ciise wuxuu cafiyaa dambiga

“Goortuu rumaysadkoodii arkay ayuu ku yidhi, ‘Ninyohow, dambiyadaadu waa kaa cafisan yihiin.’ Markaasaa culimadii iyo Faarisiintii waxay billaabeen inay fiiriyaan, iyagoo leh, ‘Ayuu yahay kan caytamayaa? Ayaa dembiyo cafiyi kara Eebbe kaliya maahee?’ Laakiin Ciise goortuu fikraddoodii gartay, ayuu u jawaabay oo ku yidhi, ‘Maxaad qalbiyadiinna uga fikiraysaan? Iyamaa hawl yar in la yidhaahdo dambiyadaadu waa kaa cafisan yihiin, ama in la yidhaahdo, kac oo soco? Laakiin si aad ku garataan in Wiilka aadanuhu dhulka ku leeyahay amar uu dambiyada ku cafiyo, (markaas ayuu ninkii curyaanka ahaa ku yidhi), waxaan kugu leeyahay, kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag.’ Kolkiiba hortood ayuu kacay, oo qaatay wixii uu ku jiifay, oo gurigiisa tegay, isagoo Eebbe ammaanaya.” Luukos 5:20-25.

“Ciisana wuxuu ku yidhi, ‘Anna ku xukumi maayo ee soco oo hadda kadib ha dambaabin.’” Yooxana 8:11.

“Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, ‘Aabboow iyaga cafi, waayo garan maayaan waxay samaynayaan.’” Luukos 23:34.

“Taasu way wanaagsan tahay, waana mid Eebbaha badbaadiyaheenna ahu aqbali karo. Wuxuu doonayaa in

dadka oo dhamu badbaado oo ay runta gartaan." 1Timoteyos 2:3-4.
"Eebbe wiilka uguma soo dirin dunida inuu xukumo dunida, laakiin wuxuu u soo diray inay dunidu ku badbaaddo Isaga." Yooxana 3:17.

Sawir: Ciise wuu cafiyaa dambiga oo bogsiiyaa dadka

25. Ciise dadka wuu bogsiiyaa

“Ciise goortuu guriga Butros galay wuxuu arkay Butros soddohdii oo jiifta oo qandhaysan. Markaasuu gacanteeda taabtay, qandhadiina waa ka baxday. Wayna kacday oo u adeegtay Isaga. Goortii makhribkii la gaadhay waxay u kaceen qaar badan oo jinniyo qaba. Eray ayuu jinniyadii ku saaray, kuwii bukay oo dhanna wuu bogsiiyay.” Matayos 8:14-16.

“Oo waxay u keeneen kuwii bukay oo dhan oo cuduro kala cayn cayn ah iyo silac qabay. Iyo kuwo jinni qaba iyo kuwo suuxdin qaba, iyo kuwo curyaan ah, wuuna bogsiiyay.” Matayos 4:24.

QAYBTA SIDDEEDAAD
CIISE WUXUU DADKA U HOGAAMIYAA EEBBE IYO NOLOSHA BUUXDA

26. Sida "Adhijirka wanaagsan" Ciise wuxuu dadka u hogaamiyaa xagga Eebbe: Aabbaha, Wiilka iyo Ruura Quduuska. (Hal Eebbe oo Saddexan).

"Waxaan ahay adhijirka wanaagsan. Adhijirka wanaagsan wuxuu naftiisa u bixiyaa idaha daraadood." Yooxana 10:11.

"Markaasaa Ciise wuxuu Toomas ku yidhi, 'Anigu waxaan ahay jidka iyo runta iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaaddo xaggayguu ku yimaaddo maahee. Haddaad i garateen, Aabbahayna waad garan lahaydeen. Hadda ka dib waad garanaysaan, waadna aragteen.' Filibos baa ku yidhi, 'Sayidow, Aabbaha na tus, waana nagu filan yahay.' Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, 'Ma intaas badan baan idinla joogay, oo aanad i garanaynin, Filibosow? Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha.'" Yooxana 14:6-9.

"Aniga iyo Aabbuhu mid baanu nahay." Yooxana 10:30. "Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna wuxuu idin siin doonaa gargaare kale inuu idinla jiro waligiin, waxaa weeye ruuxa runta ah oo aanay dunidu qaadan karin." Yooxana 14:16-17.

"Laakiin gargaaraha Ruuxa Quduuska ah oo Aabbuhu ku soo diri doono magacayga, wax kasta ayuu idin bari

doonaa, wuxuuna idin xusuusin doonaa wax walba oo aan idinku idhi." Yooxana 14:26.
"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Quduuska, oo bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray." Matayos 28:19-20.
"Rabbiga Eebbeheenna ah waa Rabbi kaliya. Waa inaad Rabbiga Eebbahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo caqligaaga oo dhan iyo xooggaaga oo dhan." Markos 12:29-31.

Sawir: Ciise wuxuu dadka u hogaamiyaa Eebbe iyo nolosha

27. Wuxuu Ciise eraygiisa ugu hoggaamiyaa dadkiisa nolol buuxda

“Idahaygu codkaygay maqlaan waanan garanayaa iyaga, wayna i raacaan.” Yooxana 10:27.

“Tan iyo yaraantaadii waxaad garanaysay Qorniinka Quduuska ah oo badbaadada kugu garansiin kara rumaysadka Ciise Masiix lagu rumaysto. Qorniin kastaa wuxuu ku ahaaday ruuxa Eebbe, oo waxtar buu u leeyahay waxbaridda iyo canaanashada iyo hagaajinta iyo edbinta xagga xaqnimada.” 2 Timoteyos 3:15-16.

“Markaasaa Ciise wuxuu xertiisa ku yidhi, ‘Mid uun hadduu doonaayo inuu iga daba yimaaddo, ha is inkiro, iskutallaabtiisana ha soo qaato, oo ha isoo raaco. Kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumin doonaa, oo kan naftiisa u lumiya aawaday wuu heli doonaa.’” Matayos 16:24-25.

“Aniguse waxaan u imid inay nolosha haystaan, oo ay badnaan u haystaan.” Yooxana 10:10. “Oo waxaan iyaga siiyaa nolosha waligeed ah, waligoodna ma lumi doonaan, ninna kama dhufsan doono gacantayda.” Yooxana 10:28. “Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay in farxaddaydu idinku jirto iyo inay farxaddiinnu buuxsanto.” Yooxana 15:11.

QAYBTA SAGAALAAD
CIISE WUXUU BADBAADIYAA DUNIDA

28. Ciise wuxuu naftiisa u bixiyay dhammaan
"Waayo, markii ugu horaysay waxaan idiin dhiibay waxaan aniguba helay, oo waxaa weeye, Masiixu wuxuu u dhintay dambiyadeenna sida Qorniinku leeyahay." 1 Korintos 15:3. "Ninna igama qaado laakiin anaa iska bixiya." Yooxana 10:18.

Sawir: Ciise wuxuu badbaadiyaa dunida

“Markaasuu haddaba u dhiibay in iskutallaabta lagu qodbo. Wayna kexeeyeen Ciise. Markaas isagoo sita iskutallaabta ayuu gaadhay meesha Dhakada la yidhaahdo, oo af Cibraaniga lagu odhan jiray Golgota. Meeshaasay iskutallaabta ku qodbeen isaga iyo laba kale, midba dhinac, Ciisana dhexda.” Yooxana 19:16-18.

“Markaas dabadeed Ciise isagoo garanaya wax kasta inay dhammaadeen, in Qorniinku ahaado, ayuu yidhi, ‘Waan haraadsanahay.’ Waxaa meeshaas yiil weel ay wayin ka buuxdo. Sidaa daraadeed isbonji ayay soo dareen wayintii, markaasay kor saareen geed haysob la yidhaahdo oo afkiisa ku dhaweeyeen. Markii Ciise wayintii qaatay ayuu yidhi, ‘Waa dhammaatay,’ oo intuu madaxa foorarshay ruuxii bixiyay.” Yooxana 19:28-30.

“Isagu wuxuu u dhintay dhammaan.” 2 Korintos 5:15.

“Laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu wali dambiilayaal nahay, oo sidaasuu Eebbe jacaylkiisii inoogu muujiyay.” Rooma 5:8.

“Waxaad ogtihiin inaan dabeecaddiinii bilaashka ahayd oo aad awoowayaashiin ka dhaxasheen laydinkaga soo furan waxyaalaha baaba’aya oo ah sida lacagta iyo dahabka laakiinse waxaa laydinku soo furtay dhiiggii qaaliga ahaa ee Masiix oo ah sidii wan yar oo aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn.” Butros 1:18-19. “Bal eega, wanka Eebbe ee dambiga dunida qaadaya.” Yooxana 1:29.

29. Ciise waa ula ujeedada iimaankeenna ee Eebbe
“Eebbe intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyay wiilkiisa kaliya oo dhashay in mid kasta oo isaga rumaystaa uusan lumin balse uu lahaado nolosha waligeed ah.” Jooxana 3:16.
“Innagoo fiirinayna Ciise oo ah billaabaha iyo dhammeeyaha rumaysadkeenna.” Cibraaniyada 12:2.

30. Ciise wuxuu inaga samatabixiyay gudcurka iyo xukunka
“Isagu waa inaga samatabixiyay xoogga gudcurka oo wuxuu inoo baddalay boqortooyadii wiilka jacaylka, kaasoo aynu ku leenahay madaxfurasho ah dambi dhaafka.” Kolosay 1:13-14.
“Sidaa daraadeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa haatan xukun ma laha.” Rooma 8:1. “Kii hadalkayga maqla oo rumaysta kii isoo diray, wuxuu leeyahay nolosha waligeed ah, xukunna gali maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha u soo gudbay.” Yooxana 5:24.

31. Ciise dambiyadeenna wuu cafiyay oo ina daahiriyay
“Goortuu rumaysadkoodii arkay ayuu ku yidhi, ‘Ninyahow, dambiyadaadu waa kaa cafisan yihiin.’” Luukos 5:20. “Sidaa daraadeed, Ciisena si uu dadka quduus kaga dhigo dhiiggiisa wuxuu ku xanuunsaday magaalada dibaddeeda.” Cibraaniyada 13:12. “Oo

dhiigga Ciise, oo wiilkiisa ah wuxuu inaga nadiifiyaa dambi oo dhan." 1 Yooxana 1:7.

32. Ciise wuxuu ku dhawaaqay inaan nahay "dambilaawayaal"

"Hadiyaddu ma ahan sida mid qof dambaabay ku timid, waayo, mid xukunkiis wuxuu keenay ciqaab, laakiin hadiyaddu waxay dambiyo badan ugu timid inay xaq ka dhigto kuwo badan." Rooma 5:16.

33. Haddaynu Ciise la jirno, xagga ruuxa waan ka nool nahay

"Laakiinse Eebbaha naxariista hodonka ku ahu wuxuu inagu jeclaaday jacalkiisa wayn, oo sidaas daraaddeed markii aynu xadgudubyadeenna ku dhimanay wuxuu inala soo nooleeyay Masiix." Efesos 2:4-5.

"Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baaba'aya, waxaase laydinku dhalay abuur aan baaba'ayn oo ah erayga Eebbe oo nool, oo waara." 1 Butros 1:23.

"Laakiinse markii raxmaddii Eebbaheenna badbaadiyaheenna ah iyo jacalkii uu dadka u qabay muuqdeen, ayuu ina badbaadiyay. Inaguma uu badbaadin shuqullada xaqnimada oo aynu samaynay, laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyay nadiifinta dhalashadii labaad iyo cusboonaysiinta Ruuxa Quduuska ah." Tiitos 3:4-5.

34. Rumaynteenna Ciise, ayaan Eebbe hortii xaq ku noqonay

“Maxaa yeelay, shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo Eebbe hortiis, waayo, sharciga ayaa lagu gartaa dambiga. Laakiin haatan sharciga la’aantiis ayaa xaqnimada Eebbe la muujiyay. Waxaana u maragfuray sharcigaa iyo nabiyadii, waxaana weeye xaqnimada Eebbe ee lagu helo rumaysadka xagga Ciise Masiix oo u ah in alla inta rumaysata oo dhan, waayo, kala duwanaan ma leh. Maxaa yeelay, dhammaan way wada dambaabeen oo garan waayeen ammaanta Eebbe; iyagoo hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa xagga madax furashada Ciise Masiix ku furtay.” Rooma 3:20-24.

“Laakiin kii aan shaqayn ilowse rumaysta kan xaq ka dhiga kuwa aan cibaadada lahayn, rumaysadkiisa waxaa lagu tiriyaa xaqnimo.” Rooma 4:5.

“Wuxuu isaga oo aan dambi aqoonin ka dhigay inuu dambi noqdo aawadeen, inaynu noqonno xaqnimada Eebbe ee ku jirta Isaga.” 2 Korintos 5:21.

35. Ciise wuxuu naga badbaadiyaa cadhada Eebbe oo wuu nala heshiiyaa

“Haddaba haddaynu haatan dhiigiisa xaq ku noqonnay, si ka badanna isagaynu kaga badbaadi doonaa cadhada Eebbe.” Rooma 5:9. “Sidaas daraadeed, innagoo xaq laynagaga dhigay rumaysad, nabad baynu xagga Eebbe ku haysannaa Rabbigeen Ciise Masiix.” Rooma 5:1.

36. Ciise wuu ka guulaystay shaydaanka iyo dhimashada

“Caruurtu waxay qayb ka helaan jidh iyo dhiig, taas aawadeed isaguna sidaas oo kale ayuu uga qayb qaatay inuu dhimasho ku baabi’iyo kii xoogga dhimashada lahaa, oo ah ibliiska, iyo inuu furo kulli kuwii cimrigoodii oo dhan addoonnimo ugu hoos jiray cabsida dhimashada.” Cibraaniyada 2:14-15.

37. Ciise wuu inala saaxiibaa

“Waayo, haddii intaynu col la ahayn, Eebbe wuxuu inagula heshiiyay dhimashadii Wiilkiisa.” Rooma 5:10. “Laakiinse haatan isagu wuxuu idinkula heshiiyay jidhkiisii aadmiga oo dhintay inuu Isagu hortiisa idin keeno idinkoo quduus ah oo aan iin iyo eed midna lahayn.” Kolosay 1:22.

38. Ciise wuxuu inoo doortay inaynu kuwiisa ahaano

“Idinku imaydaan dooran, laakiinse anaa idin doortay.” Yooxana 15:16. “Laakiinse idinku waxaad tihiin jinsi la doortay iyo wadaadada boqorka iyo quruun quduus ah iyo dad Eebbe iska leeyahay, inaad ogaysiisaan wanaagga kan gudcurka idiinka yeedhay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh.” 1Butros 2:9. “Qiimo wayn baa laydinku soo iibsaday, addoomada dadka ha noqonnina!” 1Korintos 7:23.

39. Ciise wuu na jecel yahay
“Siduu Aabbuhu ii jeclaaday ayaan anna idiin jeclaaday.” Yooxana 15:9. “Ninna ma leh jacayl kan ka wayn, inuu nin naftiisa u bixiyo saaxiibadiis.” Yooxana 15:13.

40. Ciise wuu na bogsiiyaa
“Waxaad ku bogsateen xariijimihii karbaashiddiisii.” Butros 2:24

41. Ciise farxad ayuu ina siiyaa
“Waxaan waxyaalahaas idinkula hadlay in farxaddaydu idinku jirto, iyo in farxaddiinnu buuxsanto.” Yooxana 15:11. “Waxaa barakaysan kuwa xadgudubyadooda la cafiyay oo dambiyadooda la daboolay.” Rooma 4:7. “Dadkii oo dhan ayaa ku rayreeyay wax walba oo ammaanta lahaa oo uu falay.” Luukos 13:17. “Ku farxa in magacyadiinu ay jannada ku qoran yihiin.” Luukos 10:20.

42. Ciise meel ayuu inooga diyaariyaa jannada
“Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan idiin sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tagayaa inaan meel idiin sii diyaariyo.” Yooxana 14:2.
43. Ciise wuxuu dadkiisa siiyaa nolosha waligeed ah

“Waayo, mushahaarada dambigu waa dhimashada, laakiinse, hadiyadda Eebbe waa nolosha waligeed ah ee lagu helo Rabbigeen Ciise Masiix.” Rooma 6:23.
“Oo waxaad iyaga siisaa nolosha waligeed ah, waligoodna ma lumi doonaan, oo ninna kama dhufsan doono gacantooda.” Yooxana 10:28.
“Ciise ayaa ku yidhi, ‘Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo nolosha. Kii i rumaystaa inkastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa. Kii kasta oo nool oo i rumaystaa waligii ma dhiman doono.’ Waxaan ma rumaysan tihiin?” Yooxana 11:25-26. “Runtii waxaan kugu leeyahay, maanta firdowska ayaad igula jiri doontaa.” Luukos 23:43.

44. Ciise wuxuu badbaado siiyaa dunida
“Eebbe intuu dunida jacayl u qabay ayuu wiilkiisa kaliya oo dhashay in mid kastaa oo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha waligeed ah.” Yooxana 3:16. “Mid kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, ma jiro magac kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyay oo waajib inoo ah inaynu ku badbaadno.” Falimaha Rasuulada 4:12. “Ciise wuxuu ku yidhi, ‘Maanta badbaadinta ayaa gurigan timid.’” Luukos 19:9.

QAYBTA TOBNAAD
CIISE WUXUU DADKIISA SIIYAA NOLOSHA CUSUB

45. Ciise wuxuu ka soo sarakacay dhimashada, wuxuuna u muuqday kuwii Isaga raacay

“Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, ‘Haweeney yahay, maxaad u ooyaysaa? Kumaad doondoonaysaa?’ Iyadoo u malaynaysa inuu yahay ninkii beerta ka shaqaynayay waxay ku tidhi, ‘Adeerow, haddaad Isagii halkan ka qaaday, ii sheeg meeshaad dhigtay, anna waan ka soo qaadan doonaaye.’ Ciise wuxuu ku yidhi, ‘Maryaney.’ Markaasay jeedsatay oo afka Cibraaniga ku tidhi, ‘Rabbooni’ (oo ah macallimow).” Yooxana 20:15-16.

Sawir: Ciise wuxuu dadkiisa siiyaa nolosha cusub

“Halkan ma joogo, waayo wuu ka sarekacay siduu yidhi. Bal kaalaya oo arka meeshii Rabbigu jiifay. Dakhso u taga oo waxaad xertiisii ku tidhaahdaan, kuwii dhintay ayuu ka soo sarekacay, oo wuu idinka hormarayaa ilaa Galili. Halkaasna waad ku arki doontaan. Bal eega, waan idiin sheegaye. Dhakhsaba waxay xabaashii kala tageen baqdin iyo farxad wayn, oo waxay u ordeen inay xertiisa u waramaan. Kolkaasaa Ciise ka hor yimid oo ku yidhi, ‘Nabad. Markaasay u dhawaadeen oo intay cagihiisa qabteen ayay caabudeen.” Matayos 28:6-9.

“Oo muddo afartan maalmood ah ayuu u muuqday iyagii oo kala hadlay waxyaalaha ku saabsan boqortooyada Eebbe.” Falimaha Rasuullada 1:3.

“Waayo markii ugu horaysay waxaan idiin dhiibay waxaan aniguba helay, oo waxaa weeye, Masiixu wuxuu u dhintay dambiyadeenna sida Qorniinku leeyahay, waa la aasay Isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sarekiciyay sida Qorniinku leeyahay. Markaasuu Butros u muuqday, markii dambena laba iyo tobankii. Markaasuu mar kaliya u muuqday kuwo ka badan shan boqol oo walaalaha ah.” 1Korintos 15:3-6. Markii ugu dambaysayna aniga oo dhicis oo kale ah ayuu ii muuqday.” 1Korintos 15:8.

46. Sarekicidda Ciise waxay dadkiisa u keentaa nolol cusub

“Waan noolahay taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan.” Yooxana 14:19. “Eebbe baa wiilkiisa kaliya oo dhashay dunida u soo diray si aynu ugu noolaanno isaga, oo taasaa jacalka Eebbe laynoogu muujiyay, oo taas jacayl baa ku jira, mana aha inaynu Eebbe jeclayn, laakiinse isagaa ina jeclaaday, oo wuxuu wiilkiisa u soo diray si uu kafaaragudka dambiyadeenna u noqdo. Saaxiibada qaaliga ahow, haddii Eebbe sidaa inoo jeclaaday, waa inaynu is jeclaanaa.” 1Yooxana 4:9-11.

“Aniga ma aha kan nooli, laakiin Masiix ayaa igu dhex nool.” Galatiya 2:20. “Waayo mushaarada dambigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda Eebbe waa nolosha waligeed ah ee laga helo Rabbigeen Ciise Masiix.” Rooma 6:23. “Kor ama hoos, ama uun kaleeto inagama sooci karo jacalka Eebbe ee ku jira Rabbigeen Ciise Masiix.” Rooma 8:39.

“Maya, waxyaalahan oo dhan dhexdooda aad baynu ugu guulaysannaa kii ina jeclaa xaggiisa.” Rooma 8:37. “Haddaba, maxaan waxyaalahan ka nidhaahnaa? Haddii Eebbe inala gees yahay, yaa inaga gees ah? Kii aan xataa Wiilkiisa lexelajeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyay, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin Isaga?” Rooma 8:31-32. “Sidaa darteed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan xukun ma laha.” Rooma 8:1.

“Isagu wuxuu u dhintay dhammaan in kuwa nooli aanay u sii noolaan naftooda, laakiin ay u sii noolaadaan kan aawadood u dhintay oo u sarekacay.” 2 Korintos 5:15.
“Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan idiin sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tagayaa inaan meel idiin sii diyaariyo. Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo, mar dambe waan soo noqon doonaa in meeshaan joogo idinkuna aad joogtaan.” Yooxana 14:2-3.
“Wuxuu ku yidhi, ‘Runtii, waxaan kugu leeyahay, maanta janna Firdoosa ayaad igula jiri doontaa.” Luukos 23: 43.
“Ammaanu ha u ahaato Eebbaha ah Aabbaha Rabbigeen Ciise Masiix. Naxariistiisa badan aawadeed ayuu mar kale ina dhalay inaynu rajo nool ku helno sarekiciddii Ciise Masiix ka sarekacay kuwii dhintay, oo aynu helno dhaxal aan dhammaanayn, oo aan nijaasoobayn, oo aan baaba’ayn, oo jannada laydinku kaydiyay.” 1Butros 1:3-4.
“Isaga ma aydaan arkin, waadse jeceshihiin, hadda in kastoo aydaan arkin, waad rumaysan tihiin, oo waxaad ku faraxdaan farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh. Waxaadna helaysaan waxa rumaysadkiinnu ku dhammaado oo ah badbaadada naftiinna.” 1Butros 1:8-9.

QAYBTA KOW IYO TOBNAAD
CIISE WUXUU DHISAA KANIISADDIISA

47. Ciise wuxuu dhisaa kaniisaddiisa
"Oo dhagaxaan ayaan ka dul dhisan doonaa kaniisaddayda." Matayos 16:18.

48. Ciise wuxuu adeegsaday Qorniinka si uu isu muujiyo
"Markaasuu ka billaabay Muuse iyo nabiyada oo dhan, Qorniinka oo dhanna ayuu uga macneeyay wixii Isaga qudhiisa ku saabsanaa." Luukos 24:27.

49. Eraygiisa ayuu Eebbe dadka iimaan ku siiyaa
"Waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysaan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Eebbe iyo inaad nolosha ku lahaataan Isaga magaciisa idinkoo rumaynaya." Yooxana 20:31.
"Waa ruuxa kan wax nooleeya, jidhkuse waxba ma taro. Erayadii aan idinkula hadlayna waxay idin siinayaan Ruuxa Eebbe ee nolosha." Yooxana 6:63.
"Waayo, anigu Injiilka ka xishoon maayo, maxaa yeelay, waa u xoogga Eebbe xagga badbaadinta ku alla kii rumaysta." Rooma 1:16.

50. Ciise wuxuu soo diraa Ruuxa Quduuska si uu u xoojiyo dadkiisa

“Markuu yimaaddo Gargaarahu oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono, isagoo ah ruuxa runta oo xagga Aabbaha ka soo baxa, ayuu ii maragfuri doonaa. Idinkuna waad ii maragfuri doontaan, waayo tan iyo billowgii waad ila jirteen.” Yooxana 15:26-27.

“Waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa Quduusku idinku soo dago, oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yerusaalem, Yuhuudiya oo dhan iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog.” Falimaha Rasuulada 1:8

51. Markhaatiyada Ciise waxay gacan ka gaystaan in warkiisa san ku faafo dadka oo dhan meel walba

“Oo intuu Qorniinkan ku billaabay ayuu ku wacdiyay Ciise.” Falimaha Rasuulada 8:35. “Maalin walba macbudka dhexdiisa iyo guryahaba kama ay joojin inay dadka baraan oo ay ku wacdiyaan wax ku saabsan Ciise Masiix.” Falimaha Rasuulada 5:42.

“Markiiba warkiisu wuu gaadhay dhulka Galili ku wareegsanaa oo dhan.” Markos 1:28. “Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga.” Matayos 28:19.

52. Kaniisadda Ciise way kortay

“Markaasaa hadalkii Eebbe faafay, tiradii xertuna Yerusaalem aad ugu badatay, oo tiro badan oo wadaado ahina iimaankay yeesheen.” Falimaha Rasuulada 6:7.

“Oo qaar wuxuu ka dhigay inay ahaadaan rasuullo, qaarna nabiyo, qaarna injiilayaal, qaarna qaysas iyo macalimiin. Wuxuuna sidaa u yeelay kaamilidda quduusiinta xagga shuqulka adeegga iyo xagga dhisidda jidhka Masiixa.” Efesos 4:11-12.

53. Kuwa rumaysta waxaa loogu yeedhaa Masiixiyiin

“Meeshii ugu horaysay ee xertii loogu yeedhay Masiixiyiin waxay ahayd Antiyok.” Falimaha Rasuullada 11:26.

54. Masiixiyiintu marba marka ka dambaysa way sii aqoodaan Ciise

“Ku kora nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah badbaadiyaheenna Ciise Masiix.” 2Butros 3:18.

QAYBTA LABA IYO TOBNAAD
CIISE DADKIISA WUXUU U QAADAA JANNADA

55. Ciise wuxuu kor ugu kacay xagga ammaantiisa jannada iyo awoodiisa

"Kolkuu waxyaalahaas yidhi dabadeed, iyagoo eegaya, ayaa sare loo qaaday Isagii, oo daruur baa indhahoodii ka qarisay." Falimaha Rasuulada 1:9. "Kii fadhiyay midabkiisu wuxuu u ekaa dhagax yasbid iyo dhagax sardiyos, oo carshigiisana waxaa ku wareegsanaa qaanso roobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumrud." Muujintii 4:3. "Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka lagu siiyay." Matayos 28:18.

56. Ciise mar kale ayuu muuqan doonaa

"Ciisaha samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa." Falimaha Rasuullada 1:11. "Bal eega, wuxuu la imanayaa daruuraha, oo waxaa isaga arki doona il kasta." Muujintii 1:7.

"Sida hillaacu bari uga yimaaddo oo u ifiyo galbeed, sidaas oo kale ayaa imaatinka wiilka aadanuhu ahaan doonaa." Matayos 24:27.

"Muuqashadaas uu wakhtigiisa muujin doono, kan ammaanta leh, oo ah taliyaha kaliya, oo ah boqorka boqorada iyo sayidka sayidyada." 1Timoteyos 6:15.

“Bal maqla, anigu dhakhsaan u imanayaa.” Muujintii 22:7.

57. Markuu soo muuqdo, Ciise wuxuu sarekicin doonaa kuwii dhintay

“Runtii, waxaan idinku leeyahay, saacaddu way imanaysaa, marka kuwii dhintay codka Wiilka Eebbe maqli doonaan, oo kuwa maqlaana way noolaan doonaan.” Yooxana 5:25.

58. Ciise dadkiisa wuxuu u baddali doonaa ammaanta

“Eega, waxaan idiin sheegayaa wax qarsoon. Dhammaanteen ma wada dhiman doonno, laakiin dhammaanteen waa layna baddali doonaa, dhakhsaba, intaan il laysku qaban, marka buunka ugu dambeeya la yeedhiyo, waayo, buunku waa dhawaaqi doonaa, oo kuwii dhintayna qudhun la’aan baa la sarekicin doonaa, waana layna baddali doonaa. Waayo, kan qudhmayaa waa in uu gashado qudhun la’aanta, oo kan dhimanayaana waa inuu gashado dhimasho la’aanta.” 1Korintos 15:51-53.

“Innaga waddaninimadeenu waxay ku jirtaa jannada, oo waxaynu tiigsi ku sugaynaa badbaadiyaheenna, oo ah Rabbi Ciise Masiix inuu jannada ka yimaaddo. Isagu wuxuu baddali doonaa jidhkeenna liita inuu u ekaado jidhkiisa ammaanta leh.” Filiboy 3:20-21.

“Saaxiibada qaaliga ahow, imminka waxaynu nahay caruurta Eebbe, oo wali waxaynu noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu ognahay in goortuu muuqdo aynu noqon doono sidiisoo kale.” 1Yooxana 3:2.

59. Markuu Ciise soo muuqdo adduunkan waa la baabi’in doonaa, oo Eebbe wax walba wuu cusboonaysiin doonaa

“Maalinta Rabbigu waxay u iman doontaa sida tuug oo kale. Maalintaas oo ay samooyinku baabi’i doonaan iyadoo shanqadh waynu ka yeedhayso oo waxyaalaha abuuranna iyagoo gubanaya ayay baabi’i doonaan.” 2Butros 3:10.

“Laakiinse siduu inoo ballanqaaday waxaynu sugaynaa samooyin cusub iyo dhul cusub oo xaqnimo dhex daggan tahay.” 2Butros 3:13.

“Markaasaa kii carshiga ku fadhiyay wuxuu yidhi, bal eeg wax kastaba cusayb baan ka dhigayaa.” Muujintii 21:5.

60. Ciise meel ayuu jannada uga diyaariyay dadkiisa

“Guriga Aabbahay wuxuu leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn, waan idiin sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tagayaa inaan meel idiin sii diyaariyo.” Yooxana 14:2.

“Oo waxaan arkay samo cusub iyo dhul cusub; waayo, samadii hore iyo dhulkii hore way dhammaadeen, oo baddiina mar dambe ma jirin. Oo haddana waxaan

arkay magaalada quduuska ah, taasoo ah Yerusaalem cusub oo samada ka soo dagaysa xagga Eebbe, iyadoo loo diyaariyay sidii aroosad ninkeedii loo sharaxay. Markaasaan maqlay cod wayn oo carshiga ka yeedhaya oo leh, 'Bal eeg, rugta Eebbe waxay la jirtaa dadka, oo Isna wuxuu la degganaan doonaa iyaga, oo iyana waxay ahaan doonaan dadkiisa, oo Eebbe qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan doonaa Eebbahooda; oo isna indhahooda ilmo kastuu ka tirtiri doonaa, oo dhimashana mar dambe ma jiri doonto, oo mar dambana ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona, waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen.'" Muujintii 21:1-5.

"Oo wuxuu i tusay magaalada Yerusaalem ee quduuska ah oo samada ka soo dagaysa xagga Eebbe, oo magaaladu waxay lahayd ammaanta Eebbe, oo nuurkeedu wuxuu u ekaa dhagax aad u qaali ah, oo sidii dhagaxa yasbidka oo u dhalaalaya sidii madarad oo kale." Muujintii 21:10-11.

"Oo magaaladii jidkeediina wuxuu ahaa dahab saafi ah oo u eg muraayad wax laga dhex arko." Muujintii 21:21. "Oo dhexdeedana macbud kuma arag; waayo, Rabbiga Eebbaha qaadirka ah iyo wanka ayaa waxay yihiin macbudkeeda, oo magaaladuna uma baahna qorax iyo dayax toona inay dusheeda ku iftiimaan, waayo, ammaanta Eebbe ayaa iftiin u ahayd, oo laambadeeduna waa wanka." Muujintii 21:22-23.

“Markaasaa malaa’igtii waxay i tustay webi ah biyaha nolosha, oo u dhalaalaya sidii madarad oo kale oo ka soo baxaya carshigii Eebbe iyo wanka, iyo jidkii magaalada dhexdeeda. Wabiga dhankiisan iyo dhankiisaasba waxaa ku yiil geedkii nolosha.” Muujintii 22:1-2.

61. Ciise si shakhsi ah ayuu dadkiisa ugu qaadi doonaa xagga jannada

“Mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin qaadan doonaa, in meeshaan joogo idinkuna aad joogtaan.” Yooxana 14:3.

“Goortuu wiilka aadanuhu ammaantiisa ku yimaaddo, Isaga iyo malaa’igaha oo dhan, markaasuu carshiga ammaantiisa ku fadhiisan doonaa. Quruumaha oo dhan ayaa hortiisa lagu soo ururin doonaa, oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha. Idaha wuxuu joojin doonaa midigtiisa, riyahana bidixdiisa. Markaasaa boqorku kuwa midigtiisa jooga ku odhan doonaa, ‘Kaalaya kuwa Aabbahay barakadeeyayow, oo dhaxla boqortooyada tan iyo aasaaskii dunida laydiin diyaar gareeyay.” Matayos 25:31-34.

“Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan doonaa, ‘Kuwo yahow inkaaranow, iga taga oo gala dabka waligiis ah, kan ibliiska iyo malaa’igihiisa loo diyaar gareeyay.” Matayos 25:41. “Kuwanuna waxay gali

doonaan taqsiirta waligeed ah, kuwa xaqa ahuse waxay gali doonaan nolosha waligeed ah." Matayos 25:46.
"Wuxuu ku yidhi, 'Runtii, waxaan kugu leeyahay maanta Firdoosa ayaad igula jiri doontaa." Luukos 23:43.
"Oo bal eeg, waxyaalahaas kadib waxaan arkay dad fara badan, oo aan ninna tirin karin. Kuwaas oo lagala soo dhex baxay quruun kasta iyo qabiil kasta iyo af kasta oo taagan carshiga hortiisa iyo wanka hortiisa, iyagoo qaba qamiisyo cad cad, gacmahana ku haysta caleemo timireed. Oo iyana waxay ku dhawaaqayeen cod wayn iyagoo leh, 'Badbaado waxaa leh Eebbahayaga carshiga ku fadhiya iyo wanka. Oo malaa'igihii oo dhan, odayaashii iyo afartii xayawaan waxay taagnaayeen carshiga hortiisa. Oo carshiga hortiisa ayay ku dhaceen oo intay wajigooda dhulka saareen ayay Eebbe caabudeen, iyagoo leh, 'Aamiin, Eebbahayagu waligiis iyo waligiis ha lahaado barako iyo ammaan, xigmad iyo mahad, ciso iyo xoog iyo itaal. Aamiin.'" Muujintii 7:9-12.

62. Gabagabo

"Aniga waxaa nolosha ii ah Masiixa. Oo dhimashaduna waa ii faa'iido. Laakiin inaan jidhka ku sii noolaado hadday taasu tahay midhaha hawshayda, waxaan doorto garan maayo. Laakiin anigu labada dhexdoodaan ku dhibaatoonayaa. Waxaan jeclahay inaan tago oo aan Masiixa la joogo, waayo, taasu aad bay iigu roon tahay,

laakiinse inaan jidhka ku sii jiro aad baa loogu sii baahan yahay idinka aawadiin." Filiboy 1:21-24.
"Oo markhaatiyaal ayaad iiga noqon doontaan Yerusaalem iyo Yuhuudiya oo dhan iyo Samaariya iyo meesha dunida ugu fog." Falimaha Rasuulada 1:8.
"Oo had iyo goorba shuqulka Rabbiga si aad ah u sameeya." 1Korintos 15:58.
"Innagoo fiirinayna Ciise oo ah billaabaha iyo dhammeeyaha rumaysadkeenna." Cibraaniyada 12:2.
"Oo kan kara inuu turunturada idinka ilaaliyo oo uu ammaantiisa idin hor taago, idinkoo aan iin lahayn oo aad u faraxsan, isagoo ah Eebbaha kaligiis ah oo badbaadiyaheenna ah, ammaan iyo waynaan iyo xoog iyo amar ha u ahaadeen xagga Rabbigeenna Ciise Masiix, wakhtiga oo dhan, kii hore iyo kan haatan iyo waligeedba. Aamiin." Yuudas 1:24-25.

Haddaba, haddii aad aamintay CIISE, ama aad si uun wax uga faa'iidaysatay kitaabkan yar, fadlan i soo ogaysii. Sidoo kale, haddii aad u baahan tahay nuqul dheeraad ah oo kitaabkan WARSAN OO KU SAABSAN CIISE MASIIX, iyo sawirka jaldiga oo ballaadhan midabyana leh, fadlan qoraal ku soo waydiiso ciwaanada hoos ku qoran:

Lutheran Heritage Foundation
P.O.Box 21531
Nairobi, Kenya

Lutheran Heritage Foundation
51474 Romeo Plank Road
Macomb, MI 48042
United States of America

Waxaa kaloo aad ka akhrisan kartaa ama ka koobiyaysan kartaa shabakadaha kala ah:

Af Soomaali

www.somalimission.org

www.somalimasiixi.org

Af Ingiriis
www.goodnewsaboutjesus.com